

# Qorshaha wax looga bedalayo kiradaada



Homes Victoria waxay qiraysaa una mahadcelinaysaa Mas'uuliyiinta Dhaqanka ee dhulka gurigaan lagu dhisay.  
Waxaan xushmad u heynaa Odayaashii hore iyo kuwa maanta jooga.



## Naga caawi in kiradaada ay saxnaato

Si loo siiyo kiraystayaasha wakhti ay kula qabsadaan isbeddelada kirada oo ay u dalbadaan lacag dhimis kirayn (rental rebate) ama caawimo la xiriirta dhaqaale xumo, dib u eegista kirada suuqa ayaa dib loo dhigayaa ilaa 24-ka Nofeembar 2024 oo ma dhaqan gali doonto laga bilaabo 18-ka Agoosto 2024.

Bisha Sebtembar 2024, kiraystayaasha waxay Homes Victoria ka heli doonaan warqad taas oo xaqiijinaysa qiimaha cusub ee kirada gurigooda ee bilaaban doonta 24-ka Nofeembar 2024.

Kiraystayaasha hore loogu sheegay in kirada la yarayn doono ayaa kirada laga yarayn doonaa laga bilaabo 18-ka Agoosto 2024.

## Nala soo socodsii wixii kugu soo cusboonaada

Ma jiro kireyste guri dowlad ku jira oo ay tahay inay kiro u bixiyaan wax ka badan 25% dakhliga soo gala. Tani aad bay uga duwan tahay suuqa kiraynta gaarka ah (private rental) ee aan lahayn damaanadan qiimaha kirada ah.

Inta badan kiraystayaasha, dib u eegista kirada suuqa ma saamayn doonto kirada ay bixiyaan sababtoo ah waxay helayaan lacag dhimis.

Si aad nooga caawiso in kiradaada aan saxno, fadlan noo soo sheeg 24-ka Nofeembar kahor wixii isbeddel ah ee ku yimaada dakhliga qoyskaaga ama duruufahaagar:


si aad noola soo socodsiiyo macluumaadka la xiriira dakhliga adiga iyo qoyskaaga soo gala booqo:  
[www.housing.vic.gov.au/online-services](http://www.housing.vic.gov.au/online-services)

ama

markaad soo gudbinayso foomka kiro-dhimista:  
[www.housing.vic.gov.au/market-rent-and-rental-rebates](http://www.housing.vic.gov.au/market-rent-and-rental-rebates)  
iyada oo loo sii marayo xafiiska guriyeynta ee deegaankaaga:  
[www.housing.vic.gov.au/contact-housingvic#our-offices](http://www.housing.vic.gov.au/contact-housingvic#our-offices)

1

Faahfaahinta dakhligaaga ha ahaato mid sax ah oo codso lacag dhimis (rebate) haddii aad u baahato.




2

Waxaa lagu sheegi doonaa kiradaada la cusboonaysiiyay bisha Sebtembar.



3

Kiro-dhimista waxay hirgaleysaa bisha Agoosto wixii lagu kordhinayana bisha Nofeembar.



4

Lacagta kirada lagaaga qaado waxay dib ugu noqotaa dayactirka guryaha dadweynaha.



# Hagaajinta guryaha dadweynaha

Doolar kasta oo ka soo baxa kirada waxaa dib loogu dayactiraa guryaha dadweynaha.

Kirada waxaa lagu maalgeliyaa waxyaabo ay ka mid yihiin dayactirka, nadiifinta, amniga iyo in kireysteyaasha la gaarsiiyo adeegyada kale ee muhiimka ah.

# Xaquuqda kiraystaha iyo taageerada

Waxa jirta caawimaad la heli karo markay timaado marxalad adag si kireysteyaasha aan u qalmin kiro-dhimista (rebate) looga dhimo korodhka kirada.

Adeegyada talo-bixinta maaliyadeed iyo samaqabka ayaa sidoo kale la heli doonaa laga bilaabo bisha Agoosto si loo siiyo kireystayaasha taageerooyin dheeraad ah haddii loo baahdo.

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid ama aad u baahan tahay caawimaad, fadlan nagala soo xiriir: [www.housing.vic.gov.au/contact-housingvic](http://www.housing.vic.gov.au/contact-housingvic) ama la hadal xafiiska guryeynta ee xaafadaada.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqda kiraystaha, mas'uuliyadaha, iyo taageerada booqo: [www.housing.vic.gov.au/public-renters](http://www.housing.vic.gov.au/public-renters).

# Xiriirada waxyaabahan la xiriira

Si aad wax badan uga ogaato sida loo dejiyay kirada guryaha dadweynaha, booqo: [www.homes.vic.gov.au/rent-explainer](http://www.homes.vic.gov.au/rent-explainer)

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sida loo codsado dhimista kirada, booqo:

[www.housing.vic.gov.au/market-rent-and-rental-rebates](http://www.housing.vic.gov.au/market-rent-and-rental-rebates)



## Su'aal ma qabtaa?



Iskaan garee QR koodhka ama booqo



[www.homes.vic.gov.au/rent-review](http://www.homes.vic.gov.au/rent-review)

## Fasiraada

Haddii aad jeclaan lahayd inaad ku hesho daabacaadan qaab la heli karo ama la turjumay, fadlan iimayl u dir [enquiries@homes.vic.gov.au](mailto:enquiries@homes.vic.gov.au)



# Hagaajinta guryaha dadweynaha

Doolar kasta oo ka soo baxa kirada waxaa dib loogu dayactiraa guryaha dadweynaha.

Kirada waxaa lagu maalgeliyaa waxyaabo ay ka mid yihiin dayactirka, nadiifinta, amniga iyo in kireystayaasha la gaarsiiyo adeegyada kale ee muhiimka ah.

# Xaquuqda kiraystaha iyo taageerada

Waxa jirta caawimaad la heli karo markay timaado marxalad adag si kireystayaasha aan u qalmin kiro-dhimista (rebate) looga dhimo korodhka kirada.

Adeegyada talo-bixinta maaliyadeed iyo samaqabka ayaa sidoo kale la heli doonaa laga bilaabo bisha Agoosto si loo siiyo kireystayaasha taageerooyin dheeraad ah haddii loo baahdo.

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid ama aad u baahan tahay caawimaad, fadlan nagala soo xiriir: [www.housing.vic.gov.au/contact-housingvic](http://www.housing.vic.gov.au/contact-housingvic) ama la hadal xafiiska guryeynta ee xaafadaada.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqda kiraystaha, mas'uuliyadaha, iyo taageerada booqo: [www.housing.vic.gov.au/public-renters](http://www.housing.vic.gov.au/public-renters).

# Xiriirada waxyaabahan la xiriira


Si aad wax badan uga ogaato sida loo dejiyay kirada guryaha dadweynaha, booqo: [www.homes.vic.gov.au/rent-explainer](http://www.homes.vic.gov.au/rent-explainer)

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sida loo codsado dhimista kirada, booqo:

[www.housing.vic.gov.au/market-rent-and-rental-rebates](http://www.housing.vic.gov.au/market-rent-and-rental-rebates)



## Fasiraada



[www.homes.vic.gov.au/rent-review-translations](http://www.homes.vic.gov.au/rent-review-translations)

## Su'aal ma qabtaa?

[www.homes.vic.gov.au/rent-review](http://www.homes.vic.gov.au/rent-review)

